NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.℠

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Caabuqa RSV (Caabuqa Unugyada Neefta)

# RSV Infection (Respiratory Syncytial Virus) (Somali)

RSV waxay u taagan tahay caabuqa unugyada neefta. Fayraska RSV waa fayras aad u faafa. Qofka wuxuu fayraska ku qaadi karaa taabasho ama haddii uu neefsado hawo, dheecaan (dheecaano), duuf ama candhuufo kasoo baxda afka ama sanka qofka qaba caabuqa.

Inta badan caruurta caafimaadka qaba, waxay u dareemaan sida hargabka. Hase yeeshee, ilmaha yaryar ee da'doodu ka yar tahay 6 billood waxay sambabada ka qaadi karaan caabuq aad u daran. RSV badanaa si iskiis ah ayuu u baaba'aa. Wuxuu qaadan karaa asbuuc ama labo asbuuc in cunugaagu dareemo caafimaad buuxa.

Xiliga caabuqa RSV wuxuu billoowdaa dayrta wuxuuna sii socdaa illaa dhamaadka gu'ga. RSV wuxuu inta badan ku dhacaa carruurta da'yarta ah laakiin dadka da'a walba jira ayaa qaadi kara waqti kasta inta lagu jiro sanadka. Ku dhawaad inta badan caruurta waxay qaadaan caabuqa RSV ugu yaraan hal mar kahor da'da 2 sano. Qaar aad ayay ula xanuunsadaan.

Ilmaha yaryar ee ka yar 6 billood, way u dhiman karaan. Caabuqa RSV waxaa inta badan dadka loo dhigaa isbitaal sababo la xariira caabuqa hawo mareenka yar (barar ku yimaada hawo mareenada sambabada) ama borokiitada (caabuqa sambabada).

Ilmaha dhasha xiligooda kahor (ee dhasha kahor 35 asbuuc) ama kuwa qaba xanuunada wadnaha, sambabka ama daciifnimada nidaamka jirka (daciifnimada jirka) ayaa u xanuunsan kara, si dhaqso leh.

## Astaamaha iyo calaamadaha


Astaamaha koowaad ee caabuqa RVS waxay u ekaan karaan kuwa hargabka:

- hindhiso
- biyo sanka ka yimaada ama duuf
- qandho
- qandho


©2005, Waxaa dib loo eegay 2021, Nationwide Children's Hospital
Sii Socda…

**Wac dakhtarkaaga isla markiiba, haddii cunugaagu qabo wax kamid ah astaamahaan iyo calaamadahaan:**

- qaboow uuna jiro wax ka yar 6 billood ama uu halis saaid ah ugu jiro RSV
- neef yari
  - xiiq
  - qufac
  - haddii neeftu ku yaraato, gaabato ama si dhaqso ah u imaata
  - maqaarka u dhaxeeya feeraha ama gudaha qoorta ayaa jiidma markasta oo ilmuhu neefsado (ciriri)
- haddii midabka bishimaha, carabka ama maqaar ayaa isku badela buluug ama gareey
- haddii dhibaato la xariirta wax cunida, wax cabida ama seexashada uu la kulmo
- hadduu muujiyo astaamaha biyo la'aanta (jirku qalalo) - tirada xafaayada oo yaraata



**Sawirka 1 aad**
Daawada sanka lagu buufiyo nuugida waxay ilmaha ka caawin kartaa inuu dareemo deganaan dheeraad ah.

## Ogaanshaha Cudurka

Si loo ogaado caabuqa RSV, dakhtarku wuxuu qiimeyn doonaa cunugaaga wuxuuna ka qaadi doonaa muunada sanka laga qaado. Haddii uu u baahdo, wuxuu amri doonaa raajitada xabadka.

## Daaweynta guriga

Maadaama RSV uu yahay caabuq, daawooyinka qalajiyaha ah waxba kama tarayaan. Halkaan waxaad ka helaysaa qaar kamid ah waxyaabaha aad sameyn karto si cunugaagu u dareemo deganaan dheeraad ah.

- Marka uu qufacaayo ama uu leeyahay xab (cabur), isticmaal miskiga hawada lagu uumiyo. Hawo uumintu waxay fududeyn kartaa neefta waxayna yareyn kartaa qufaca. Ha gelin daawada uumiyaha. Badel biyaha kujira maalin walba nadiifina mar kasta ood isticmaasho.
- Haddii sanka ay biyo ka imaanayaan isticmaal biyo leh cusbo (daawada) sanka lagu dhibciyo iyo caaga ilmaha sanka laga geliyo. Si aad duufka usoo saarto, isticmaal aalada sanka ee ilmaha (aalada lagu soo saaro duufka)
  lsida qalabka caaga ah ee sanka ilmaha laga geliyo (Sawirka 1 aad ) ama NoseFrida®.
- Haddii uu dareemaayo qandho, sii:
  - caruurta ka wayn 2 billood, acetaminophen (Tylenol® ka carruurta ama ilmaha yaryarka ah).

- caruurta ka wayn 6 billood, acetaminophen ama ibuprofen (Motrin®, Advil® ka carruurta ama ilmaha yaryarka ah).
- Ha siin asbiriin ama waxyaabaha wata asbiriinka ilmo kasta (Sawirka 2 aad).
- Ha siin daawooyinka hargabka iyo qufaca. Ma caawin doonaan imaha waana inaan la siin caruurta ka yar 4 sano.
- Carruurta ay da'doodu ka yar tahay hal sano ha siin malab.




**Sawirka 2 aad** Ha siin asbiriin. Akhri waxyaabaha ku qoran daawooyinka kahor inta aadan siin si aad u ogaato kuurada saxda ah ee ku habboon ilmahaaga.

- Sii cabitaano badan.
  - Carruurta **da'doodu ka yar tahay 12 billood** waa inaysan cabin cabitaanka khudaarta ama biyo. Taas badelkeeda, si joogto ah usii wax yar oo ah caanaha naaska ama kuwa dhalada.
  - Carruurta **ka wayn 12 billood**, sii cabitaano badan sida biyo ama maraq digaaga. Ka yaree cabitaanada leh sonkorta badan ama cabitaanka khudaarta.
- Hubi heerkulka canugaaga adiga oo isticmaalayo saacada cabirka dhijitaalka. Marnaba ha isticmaalin saacada cabirka meerkuriga. Si fiican u dhaq saacadaada mar walba ood isticmaasho kadib.
  - Isticmaal kaliya saacada cabirka (ee futada ilmaha la geliyo) ee ilmaha yaryar ee ka hooseeyo 3 bilood jirka.
  - Ilmaha yaryar ee jira 4 bilood ama ka weyn, qalabka heerkulka oga cabir futada, dhagaha ama kilkisha (garabka hoostiisa).
  - Marka canugaagu gaaro 4 sanno jir, heer kulka afka (afka) waa CAADI.

## Kahortaga faafitaanka caabuqa RSV

Carruurtu waxay qaadi karaan caabuqa RSV in badan. Dadka waawayn way qaadi karaan waxayna u gudbin karaan ilmaha. Haddii aad qabto hargab, taxadar samee marka aad u dhaw dahay ilmahaaga. Halkaan waxaa ku qoran qaar kamid ah tallooyinka lagu xakameeyo faafitaanka RSV:

- Badanaa dhaq gacmahaaga, kahor inta aadan taaban cunugaaga iyo intaadan qaban cunto. Dhac gacmahaaga kadib marka aad hindhisto, qufacfo, aad adeegsato musqul ama aad ilmaha ka badesho xafaayada. U sheeg dadka kale inay isla sidaan sameeyaan.
- Ku hindhis ama ku qufac tiish ama gudaha shaatigaaga gacmo dheeraha ah, ama kasii jeenso dadka.
- Ilmaha yuusan qof la wadaaagin aalabaha gaar ah sida caaga ay afka gashtaan, shukumaanka, cadeyga, galaasyada wax lagu cabo, koobabka, dhalooyinka, fargeetooyinka ama qaadooyinka.

- Si joogto ah u dhaq boonbilayaasha iyo dharka cunugaaga.
- Ka ilaali cunugaaga dadka qaba hargabka. Dadkaan waxaa kujira wiilasha iyo gabdhaha walaalihiis ah.
- Ilmaha agtiisa sigaar haku cabin. Ha u oggolaan in dadka kale ilmaha agtiisa ku cabaan sigaar.
- Marka ilmuhu xanuunsan yahay ha u dirin goobta xanaanada ama iskuulka.

## Goorta ay tahay in la waco dakhtarka

Wac dakhtarka ilmahaaga haddii ilmahaagu:

- u muuqdo inuu xanuunsan yahay, muujinaayo astaamaha RSV da'diisuna ka yar tahay 6 billood ama hais sare ku jiro.
- qabo qufac uu dareemaayo wax ka badan 4 maalmood ama uu dhibaato ku qabo neefsashada
- duuf jaalle, gareey ama cagaar ah ka keeno sanka ama afka.
- uusan lahayn awood - uu muujinaayo caajis una dhaqmaayo si uusan horey ugu dhaqmi jirin, uusana wax cabeyn waxna cuneen, uusan kaadin (cabin biyo) ama haddii xafaayadu aysan qoyin muddo dhan 6 ama in kasii badan oo saacado ah.
- qabo qandho
  - haddii uu jiro 3 billood ama kasii yar yahay, heerkulka jirkiisuna yahay 100.4º F (38º C) ama in kasii badan.
  - ka wayn yahay 3 billood, heerkulka jirkiisuna ka badan yahay 102º F (38.9º C) muddo ka badan 2 maalmood.

## RSV, hargabka iyo Covid

RSV, hargabka iyo Covid waa fayrasyo kaladuwan, laakiin astaamaha qaar isku mid ka ah. RSV iyo hargabka waxay saameyn halis ah ku keeni karaan carruurta. Hase yeeshee, astaamahooda waxay ku billoowdaan qaabab kaladuwan. RSV caadiyan wuxuu ku billoowdaa astaamaha qaboowga dhanka kale hargabka wuxuu ku billoowdaa qandho aad u sareysa. Carruurta qaba Covid waxay badanaa dareemaan astaamo khafiif ah ama maba muujiyaan wax astaamo ah, laakiin sidoo kale waxay qabi karaan qandho iyo matag ama shuban. RSV wuxuu si degdega ah halis ugu noqon karaa carruurta qaar.